Nidaamka

Adeegyada Caafimaadka ee Fairview (Fairview Health Services)

Siyaasadda

Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka Siyaasadda Qaansheegga iyo Soo Qaadista Lacagta

Ujeeddada:

Siyaasaddaan wuxuu sharaxaayaa nidaamka qaansheegga bukaanka iyo tallaabooyinka soo qaadista lacagta ee Fairview iyo HealthEast (wadajir ahaan loo yaqaano, "Fairview") (fiiri Ansixinta Ururka ee hoose si aad u hesho liis dhammaystiran ee ururada hirgeliya siyaasaddan) ee laga yaabo in la qaado haddii la bixin waayo qaansheegga daryeelka caafimaadka uu baxshey Fairview, waxaana ka mid ah tallaabooyinka aan caadi ahayn ee soo qaadista lacagta. Mabaadida hagidda ka dambeysa siyaasaddaan waa in dhammaan bukaanada iyo dammaanad-qaadeyaasha mas'uul ah (hadda ka dib loo yaqaan "bukaanka(nada)") loola dhaqmo si siman, sharaf iyo ixtiraam ah, si loo hubiyo in nidaamyada qaansheegga iyo soo qaadista lacagta si wadajir ah loo raaco, iyo in la hubiyo in dadaal macquul ah la sameeyo si loo go'aamiyo haddii bukaanku uu u qalmo caawimo sida uu dhigayo Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee Fairview (hadda ka dib loo yaqaan "FAP").

Bayaanka Siyaasadda:
Ka dib markii bukaannadeennu heleen adeegyo, waa siyaasadda Fairview in waqti hagaagsan oo sax ah ay qaansheeg u diraan bukaanada iyo hay'adaha kharash gareeya. Inta lagu jiro nidaamkan qaansheegga iyo soo qaadista lacagta, shaqaalaha Fairview waxaa ka go'an in ay adeeg macaamiil tayo leh iyo daba-raacid siiyaan dhammaan akoonada lacag ku maqan. Shaqaalaha Fairview waxay weliba sii wadi doonaan eegidda waxyaabaha tilmaamaayo haddii bukaanka uu u qalmo gargaarka maaliyadeed ee FAP iyo waxay bukaanada ku caawin doonaan hab-socodkaas.

Qeexitaannada:

ECAs – Tallaabooyinka Soo Qaadista Lacagta ee Aanan Caadi Ahayn: Waxaa ka mid ah hawlaha lacag soo qaadista soo socda:

- Xaaladaha badankood ka iibinta daynta bukaanka qof ama shirkad kale.
- U soo wargelinta hay'adda deynta macluumaad lid ku ah daynta bukaanka.
- Dib u dhigista ama diidista daryeel caafimaad loogu baahan yahay sababtoo ah dayn hore oo aan la bixinin, ama la codsado in daynta marka hore la baxsho ka hor inta aan la bixin daryeel caafimaad loogu baahan yahay.
- Tallaabooyinka u baahan nidaam sharciyeed ama garsoore; oo ay ka mid yihiin hanti qaadid, mushaar ka goosasho, banki ka goosasho ama ka xajin, bilaabista tallaabo sharciyeed madani ah, iyo tallaabooyin kale oo sharci ah.

Baahida Caafimaadeed
Daryeelka caafimaadka loogu baahan yahay waa daryeelka, marka la raaco fikradda takhtarka/daaweeyaha daawaynta bixinaya ee ay Fairview aqoonsatay iyo marka la raaco heerka daryeelka, si macquul ah loogu baahan yahay:

- Si looga hortago bilowga ama ka sii darista cudur, xaalad caafimaad, ama naafo;
- Si loo soo ogaado cudurka;
- Si loo bixiyo daawaynta yaraynta xanuunka, saarista cudurka ama soo celiska xaaladda oo laga bixiyo xaaladaha caafimaadka jirka, habdhaqanka iyo/ama maskaxda; iyo/ama
- Si shakhsiga looga caawiyo in uu gaaro ama sii haysto kartida waxqabadka ee uu ku sameeyo waxqabadyada maalin walba, iyadoo la tixgelinayo kartida waxqabadka ee shakhsiga iyo weliba kartiyaha waxqabadka ee ku habboon shakhsiyaadka ay isku da' yihiin.
- Adeegyada caafimaadka loogu baahan yahay waxaa ka mid ah adeegyada bukaanjiif iyo bukaansocod ah ee lagu dhigay Cinwaanka XIX ee Sharciga Badbaadada Bulsheed ee Federaalka (Federal Social Security Act), iyo adeegga isbitaalka ee bukaanjiif ama bukaansocod ah ee lagu daboolo loona arko mid

caafimaadka loogu baahan yahay marka la raaco Cinwaanka XVIII ee Sharciga Badbaadada Bulsheed ee Federaalka. Maxaa dheer, daryeelka ay xarun isbitaal ku bixiyaan iskaashi ama shirkadda nooca LLC taasoo uu isbitaalku ku leeyahay dan raasumaal ama macaash ayaa u qalma caawimada maaliyadeed. Waa in adeegyada loo fuliyo si ku toosan xeerasha qaran ee xirfadda caafimaadeed ee caadi ahaan la aqbalo waqtiga adeegyada la bixiyo. Waa in adeeg kaste uu dhanka qiyaasta, muddada, iyo baaxadda ugu filnaado in uu si macquul ah u buuxiyo ujeeddadiisa.

- Adeegyada caafimaadka loogu baahan yahay kuma jiraan adeegyada noocoodu yahay dhexgallada tijaabada ah ama qurxinta ah.
- Xaaladaha kale ee taageersan baahida caafimaadeed ee loo qabo daawayno gaar ah waxaa ka mid ah:
  - Caddaynta cilmisayniska ee tayo sarraysa ee lagu muujiyo in bukaanada qaba xaaladdan caafimaad ee gaarka ah ay ka faa'iido heli doonaan daawaynta la codsaday;
  - Nooca faa'iidada ayaa bukaanka muhiim u ah; oo/ama
  - Waxaa laga fiirsaday oo la iska dhaafay daawaynada nooc kale ah iyo dariiqyada bixinta daawaynta ee ka kharash yar.

Dhexgallada Tijaabada ah

Dhexgallada tijaabada ah waa daawayno iyo dhexgallo ama hawlo aanay caadi ahaan u aqbalin kuwo nabad ah oo waxtar leh khuburrada laanta habboon marka la soo ogaanayo, laga hortagayo ama la daawaynayo xaaladda caafimaad ee laga fiirsanayo. Marka la go'aaminayo in dhexgal uu tijaabo yahay, arrimaha habboon in laga fiirsado waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna:

- haddii dhexgalku uu diyaar ku yahay oo keliya daraasadda daawaynta ee uu qayb ka yahay;
- haddii maqaallada habboon ee ku jira wargeysyada ay filku dib u eegeen ay ku baaqayaan in daraasad ama baaris dheeraad ah lagu sameeyo dhexgalka loogu talagalay xaaladda caafimaad ee laga fiirsanayo; ama
- haddii dhexgalka loo isticmaali doono qayb kaloo jirka ka mid ah, si kaloo aad uga duwan, iyo/ama xaalad kaloo caafimaad, oo ka duwan sida ay caadi ahaan u aqbaleen khuburrada kale ee laanta habboon [gudaha Fairview, Labada magaalo ee Deriska ah (Twin Cities), Minnesota, Maraykanka, iwm.].

Culayska Aanan Canshuur Ahaan La Sii Wadi Karin

Xaaladda keenta in kharash badan uu saarmo urur Fairview ka mid ah oo canshuurta laga dhaafo si uu adeegga u bixiyo iyo marka ay timaaddo in tirada bukaanada suurogalka ah in ay adeegga u baahdaan ay ka dhigan tahay in ururku uusan isla adeeggaas bixin karin isagoo aanan si hagaagsan lacagta ugu celinin dhammaan bukaanada isla xaaladdaas ku sugan oo uusan canshuur ahaan mas'uul noqon karin.

Qoyska

Marka siyaasaddan laga hadlayo, qoysku waxa weeyaan:

- Labo lammaane oo is qaba iyo dadka ku tiirsan, sida ku qayaxan tilmaamaha IRS.
- Shakhsi haysta dad ku tiirsan sida ku qayaxan tilmaamaha IRS.
- Qof aanan xaas lahayn oo aanan haysanin dad ku tiirsan.

Tilmaamaha saboolnimada ayaa si gooni ah loogu eegi doonaa qoys kaste oo guri ku jira haddii gurigu uu ka kooban yahay in ka badan hal qoys.

Hab-socodka:

I. Qaansheegga Bukaanka:

Waa ujeeddada Fairview inay codsiga bixinta qaansheegga oo sax ah iyo waqtigii loogu talagalay u diraan shirkadda caymiska. Inkasta oo ay ku xiran tahay macluumaadka iyo is-gaarsiinta laga helay bukaanka iyo bixiyeyaasha, Fairview wuxuu bixin doonaa adeeg daba-gal ku filan si loo hubiyo in bukaanka helo macluumaad akoon iyo qaansheeg sax ah iyo helo fursad uu ku baxsho lacagta iyo/ama dalbado daryeelka samafalka ah. Nidaamka qaansheegga waxaa taageeri doono hab-raacyadaan soo socda:

A. Dhammaan bukaanada caymis qabo, Fairview waxay waqtigii loogu talagalay qaansheegga u diri doonaan shirkadda caymiska (uu baxshey ama soo xaaqiijiyay bukaanka), iyadoo laga reebaayo xaaladahaan soo socdo:
   - Shirkad caymiska ka baxsan dalka - Bukaanka waxaa la siin doonaa marka uu codsado nuqulka qaansheegga si ay laftigooda u diraan shirkaddooda caymiska. Fairview wuxuu bukaanka ka filaayaa inuu lacagta baxsho 90 maalmood gudahood. Waxaa laga yaabaa in Fairview uu qaansheegga u diro

shirkadda caymiska ka baxsan dalka, haddii ay sidaasi doorbidaan, kaasoo ku salaysan xaaladda kiis walba si ay bukaanka asxaan u sameeyaan.

B. Ayadoo ku salaysan Heshiisyada hadda ee Xeerasha Soo Qaadista Lacagta ee Xeer Ilaaliyaha Guud, dhammaan bukaanada aan caymis lahayn ee Minnesota ama Wisconsin degan ee hela adeegyada daryeelka caafimaadka loogu baahan yahay oo isbitaaal ku salaysan waxay heli doonaan sicir dhimis aanan caymis lahayn. Sicir-dhimista aanan caymis lahayn wuxuu la mid ahaan doonaa sicir dhimista aan siinno shirkadda ugu weyn ee aan dawliga ahayn iyo baaqiga waxaa loo diri doonaa bukaanka waqtigii loogu talagalay kaasoo la socdo qaansheeg faahfaahsan, kaasoo qayb ka ah nidaamka qaansheegga caadiga ah ee Fairview. Bukaan walba wuxuu soo codsan karaa bayaanka faahfaahsan ee akoonkooda.
C. Haddii shirkadda caymiska diido inuu baxsho (ama socodsiin waayo) qaansheegga khaladaad uu Fairview sameeyay awgeed, Fairview bukaanka uma diri doono qaansheeg qadarkiisu ka badan yahay lacagta la rabey in bukaanku waajib ahaan baxsho haddii shirkadda caymiska bixin lahaa qaansheegga.
D. Haddii shirkadda caymiska diido inuu baxsho (ama socodsiin waayo) qaansheegga sababo ka baxsan awoodda Fairview, shaqaalaha Fairview waxay la macaamili doonaan shirkadda caymiska iyo bukaanka sida ugu habboon si loo fududeeyo xallinta lacag-bixinta. Haddii codsiga lacag-bixinta la xallin waayo dadaal dabagal macquul ah ka dib, waxaa laga yaabaa in Fairview qaansheegga u diraan bukaanka ama qaadaan tallaabo kale oo ku waafaqsan heerarka hab-dhaqanka ugu fiican ee Fairview.
E. Dhammaan bukaanada loo diray qaansheeg waxay heli doonaan fursad ay Fairview kala xiriiraan gargaar maaliyadeed ama ka wada hadlaan qorshe lacag-bixin waqti kasta intii lagu jiro nidaamka qaansheegga.

II. Ka Soo Qaadista Bukaanka iyo Hay'adda Daynta Aruuriso:

A. Waa in ugu yaraan 3 qansheeg kala duwan ee soo qaadista lacagta akoonada la iska baxsho boosto ama email loo diro cinwaanka bukaan kasta; hase-yeeshee, haddii aanan loo baahnayn in qaansheegyo dheeraad ah la diro ka dib markii uu bukaanka soo diray codsiga dhammaystiran ee gargaarka maaliyadeed ee FAP ama uu si buuxda u bixiyay qaansheegga. Waa in ugu yaraan 60 maalmood ka soo wareegato waqtiga u dhexeeya dirista koowaad iyo ugu dambeeyo ee 3da qaansheeg loo baahan yahay in la diro. Waa waajibaadka bukaanka in ay bixiyaan cinwaan sax ah waqtiga ay adeegga helaan ama marka ay guuraan. Haddii akoonka uusan lahayn cinwaan sax ah, shaqaalaha waxay go'aamin doonaan haddii uu jiro habab kale lagu heli karo bukaanka. Dhammaan akoonada bukaanka keli ah ee iskooda lacagta baxsho waxaa ka mid noqon doona, laakiin kuma koobna:
    1. Macluumaad koobaan oo sax ah ee adeegyada ku qoran bayaanka - bayaan-warbixineedka koowaad oo kaliya
    2. Ogeysiis qoraal ah oo bukaanada ogeysiinaaya iyo wargelinaaya helitaanka gargaarka maaliyadeed ee FAP ee isbitaalka, oo ku jiro lambarka teleefonka waaxda iyo cinwaanka tooska ah ee barta internetka, halkaasoo laga heli karo nuqullada dukumentiyada.
B. Haddii bukaanku uu khilaafsan yahay wixii ku qoran akoonkiisa iyo/ama soo codsado dukumentiyada ku saabsan qaansheegga, Fairview wuxuu dukumentiyada la soo codsadey si qoraal ah u diri doonaa 7 maalmood gudahood. Haddii 7 maalmood gudahood jawaab lagu bixin karin, warqad caddaynaayo in la helay codsiga ayaa bukaanka loo diri doonaa 7 maalmood gudahood, akoonkana waa la joojin doonaa 30 cisho ka hor intii la sii wadin soo qaadista lacagta, laga bilaabo taariikhda jawaabta la soo diray iyadoo la raacayo Siyaasadda Cabashada Fairview. Heerarka jawaab-celinta Fairview ee kor ku xusan waxay sidoo kale khuseysaa hay'adaha daynta aruuriyo iyo qareennada daynta aruuriyo.
C. Cabashoyinka daryeelka bukaanka waxaa lagu maareyn doonaa habka cabashada bukaanka, kuwaasoo xallin doono iyo u jawaabi doono bukaanka. Akoonka(yada) waxaa loo ilaalin doonaa sida ugu habboon.
D. Iyadoo la adeegsanayo bayaanada qaansheegga, waraaqo iyo wicitaan telefoon, Fairview waxay si taxadar ah u samayn doonaan tallaabooyinka xiriirka bukaanada si ay u xalliyan akoonada baaqi ku maqan, oo ay ku jirto eegidda haddii bukaanka uu u qalmo daryeelka samafalka ah. Haddii akoonada la xallin waayo inta lagu guda jiro nidaamkan, waxaa laga yaabaa in baaqiga daynta loo gudbiyo hay'ad saddexaad ama qareen si lacagta loo soo qaado.

III. Lacag Soo Qaadista Sharciyaysan iyo Tallaabooyinka Soo Qaadista Lacagta ee Aanan Caadi Ahayn:

A. Iyadoo la addeecaayo shuruudaha siyaasaddan, waxaa laga yaabaa in Fairview ay daynta ku soo aruuriyaan habka lacag soo qaadista sharciyaysan iyo qaadaan tallaabooyin kasta oo sharci ah, oo ay ku jiraan Soo Qaadista Lacagta ee Aanan Caadi Ahayn (ECA), si ay u helaan lacagta adeegga caafimaadka ay baxsheen.
B. Tallaabooyinka Soo qaadista lacagta ee Aanan caadi ahayn waxaa la bilaabi karaa sida soo socota:
    1. Bukaanka waxaa la siin doonaa ugu yaraan 120 maalmood ka dib marka ugu horraysa ee qaansheegga la diro ka hor intii la bilaabin ECA, Fairview sidoo kale waxay bukaanka siin doonaan ugu

yaraan 240 maalmood laga bilaabo taariikhda qaansheeggaas sii uu u dalbado daryeelka samafalka ah ee FAP.

2. Haddii bukaanku uu dalbaday daryeelka samafalka ah ee FAP ka hor intii la bilaabin lacag soo qaadista sharciyaysan, Fairview wuxuu go'aamin doonaa u qalmidda bukaanka ka hor intii la bilaabin ECA. Haddii bukaanku lixda biloood ee la soo dhaafey helay go'aanka daryeelka samafalka ah, go'aankaan hore ayaa la isticmaali doonaa aysan ka eheen haddii xaaladaha bukaanka si xoog ah is-beddelay kaasoo sababi karo dib u eegid cusub.
3. Ka hor inta daynta lagu soo aruurinin habka lacag soo qaadista sharciyaysan, Fairview wuxuu samayn doonaa baaritaanka u qalmidda daryeelka samafalka ah si loo go'aamiyo haddii dayn kasta laga reebi karo lacag soo qaadista sharciyaysan Wixii dayn la doonaayo in lagu soo aruuriyo habka lacag soo qaadista sharciyaysan, Fairview waxay marka hore bukaanka siin doonaan ogeysiis qoraal ah inay damacsan yihiin inay ECA sameeyaan. Ogeysiiskani waa inuu lahaadaa warar cad ee koobaan ee ku saabsan FAP oo waa in la bixiyaa ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta la bilaabin ECA. 30kaan maalmood gudaheed, Fairview wuxuu xittaa si macquul ah ku dadaali doonaa inuu hadal ahaan bukaanka ogeysiiyo inuu rabo inuu bilaabo ECA, iyo in uu bukaanka ogeysiiyo Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee Fairview. Tusaale dadaal macquul ah ee ogeysiis hadal waxaa ka mid ah wicitaanka bukaanka oo u dhaafid fariin telefoon. Xafiiska Dhexe ee Ganacsiga waa waaxda mas'uul ka ah qabashada shaqadan.
4. Ka dib marka la bilaabo lacag soo qaadista sharciyaysan, qareennada daynta aruuriyo waxaa loo oggol yahay inay fuliyaan ECA, waxaana ka mid ah tallaabooyin maxkamadeed, mushaar iyo banki ka goosasho, iyo isticmaalida habab sharciyeed kale ee lacagta lagu soo qaado; hase-yeeshee waa in markii horey fasax laga helo Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka ka hor intii la bilaabin dacwo maxkamadeed. Waxyaabahaan waxaa la samayn karaa sida uu qabo Heshiisyada Xeerasha Soo Qaadista Lacagta ee Xeer Ilaaliyaha Guud sida ku qayaxan heshiiska ka dhexeeyo labada dhinac.
5. Haddii bukaanku si imaan wanaagsan ku xareeyo codsiga daryeelka samafalka ah inta uu ECA sii socdo, Fairview wuxuu ku dadaali doonaa inuu joojiyo ECA intii codsiga laga socodsiinaayo iyo go'aan kama dambeys laga gaaro.

IV. Adeegga Macmiilka:

Inta lagu jiro nidaamka qaansheegga iyo lacag soo qaadista, Fairview iyo wakiiladeeda waxay bixin doonaan adeeg macaamiil tayo leh ayagoo fulinaaya tilmaamaha soo socda:

- Fairview iyo wakiiladeeda uma dulqaadan doonaan luqad aflagaado, hanjabaad, weerar ama khiyaano leh oo ka yimaadda shaqaalahooda.
- Fairview iyo wakiiladeeda waxay sii wadi doonaan nidaam toosan si ay u macaamilaan su'aalaha iyo/ama khilaafyada bukaanka oo uu ka mid yahay lambar telefoon bilaash ah uu bukaanka wici karo iyo cinwaan xafiis ganacsi oo ay warqad u diri karaan. Macluumaadkaani wuxuu ku jiri doonaa qaansheeg iyo bayaan walba ee Fairview u diro bukaanka.
- Ka dib markii is-gaarsiin laga helo bukaanka (telefoon ahaan ama qoraal ahaan), Fairview iyo shaqaalaha wakiil u ah ayaa bukaanka sida ugu dhaqsi badan dib u wici doona (laakiin aan ka badneyn hal maalin shaqo ka dib markii la soo wacey) iyo waxay warqadaha ka jawaabi doonaan 7 maalmood gudaheeda sida uu qabo nidaamka cabashada.
- Fairview iyo wakiiladeeda waxay ilaalin doonaan diiwaanka cabashooyinka bukaanka (hadal ama qoraal).

V. Diyaar Ahaanta Siyaasadda:

- Nuqullada elektaroonigga ah ee Siyaasadda Qaansheegga iyo Soo Qaadista Lacagta Fairview, Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee Fairview iyo foomkeena Codsiga Daryeelka Samafalka ah waxaad ka heli kartaa barteena internetka: www.fairview.org/billing.
- Waxaad xittaa Xafiiskeena Dhexe ee Ganacsiga kala xiriir kartaa 612-672-6724 ama si bilaash ah wac 1-888-702-4073 iyo codso in boostada laguugu soo diro nuqullada siyaasadaheena ama kala hadal hab-socodka u qalmitaanka iyo codsiga Daryeelka Samafalka ah.
- Nuqullada warqad ee siyaasadaheena iyo foomka codsiga Daryeelka Samafalka ah waxaa laga heli karaa xafiiskeena qaansheegga oo ku yaalo 400 Stinson Boulevard NE, Minneapolis, MN 55413-2614, iyo sidoo kale isbitaal walba.

Diyaar Ahaanta Siyaasadda ee HealthEast:

- Nuqullada elektaroonigga ah ee Siyaasadda Qaansheegga iyo Soo Qaadista Lacagta HealthEast, Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee HealthEast iyo foomkeena Codsiga Daryeelka Samafalka ah waxaad ka heli kartaa barteena internetka: www.healtheast.org

- Waxaad xittaa Xafiiskeena Ganacsiga kala xiriir kartaa 651-232-1100 ama si bilaash ah wac 1-866-770-6411 iyo codso in boostada laguugu soo diro nuqullada siyaasadaheena ama kala hadal hab-socodka u qalmitaanka iyo codsiga Daryeelka Samafalka ah.
- Nuqullada warqad ee siyaasadaheena iyo foomka codsiga Daryeelka Samafalka ah waxaa laga heli karaa Isbitaal kasta.

Diyaar Ahaanta Siyaasadda Xarunta Caaafimaadka Fairview Range:

- Nuqullada elektaroonigga ah ee Siyaasadda Qaansheegga iyo Soo Qaadista Lacagta Fairview, Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee Fairview iyo foomkeena Codsiga Daryeelka Samafalka ah waxaad ka heli kartaa barteena internetka: www.range.fairview.org/QuickLinks/fap.aspx.
- Waxaad xittaa Xafiiskeena Ganacsiga kala xiriir kartaa 218-362-6624 ama si bilaash ah wac 1-877-390-6624 iyo codso in boostada laguugu soo diro nuqullada siyaasadaheena ama kala hadal hab-socodka u qalmitaanka iyo codsiga Daryeelka Samafalka ah.
- Nuqullada warqad ee siyaasadaheena iyo foomka codsiga Daryeelka Samafalka ah waxaa laga heli karaa xafiiskeena qaansheegga oo ku yaalo 750 E 34th Street, Hibbing, MN 55746.

Ansixinta Urur waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna:

Xarunta Fairview Lakes Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Ururka Fairview Medical Group ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Xarunta Fairview Northland Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Xarunta Fairview Range Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Isbitaalka Fairview Ridges Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka Fairview Southdale Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Xarunta Caafimaadeed ee Jaamacadda Minnesota (University of Minnesota Medical Center), Fairview ayaa siyaasaddan ansixisay.
Kiliniigga Grand Itasca Medical Center ayaa siyaasaddan ansixisay.
Isbitaalka HealthEast Bethesda Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka HealthEast St. John's Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka HealthEast St. Joseph's Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Isbitaalka HealthEast Woodwinds Hospital ayaa siyaasaddan ansixiyey.
Kiliniigyada HealthEast iyo ururrada kale ee Canshuurta ka saamaxan ayaa siyaasaddan ansixiyey.

Qofka Siyaasadda iska leh:

Agaasimaha Nidaamka, Wareegga Dakhliga

Waxaa Oggolaaday:

Guddiga Agaasimeyaasha Fairview (Fairview Board of Directors)

Taariikhda(khaha):

Taariikhda Hirgelidda: 4/1/05

Taariikhda la Beddelay**:** 4/03/12, 6/27/13, 3/5/14, 3/1/15, 2/1/16, 7/24/17

Taariikhda Dib loo eegay: Guddiga Fairview Ayaa Dib u Eegay oo Dib u Oggolaaday: 5/7/15, 6/17/16, 8/17/17

Taariikhda Beddelaadda La Hirgeliyey: 4/24/14, 5/7/15, 6/17/16, 11/1/17